

Diciembre  
2006

# Caafimaadka ilmaha iyo daryeelka ilmaha

Xaashida macluumaadka waalidka,

## La sheekaysiga iyo ilmaha yar

Waalid badan ayaa waxaa soo maray la yaabka iyo farxada ilmahooda dhoollawcadeeyo, kulligeena waan ognahay farxada dhoolla cadaynta ugu horraysa ee ilmaha. Horay waxaa loogu haystay wax sudfa isaga dhaca ama ah mala awaalka waalidka. Laakiin baaritaan dhowaan lagu sameeyey maskaxda ayaa muujisay aragti cusub oo ku saabsan baaxada iyo qalafsanaanta nololaha hore. Waxaa hadda la fahmay in carruurta yaryari aanay ahayn noolaha ama rabshooli yar laakiin waxay leeyihiin awood aad u baaxad weyn iyo baahiyo aan horay loo fahmin. Daraasadu waxay muujisay in waaya-aragnimada ilmaha dhashay iyo ilmanimada hore ay aad muhiim u yihiin. Waxaa kaloo la muujiyey in carruurta ay qabaan baahi bulsho iyo wada-xiriir.



Malaha waxa ugu jacaabka badani waa in ilmuhu xiriir la sameeyo dadka laga bilaabo markuu dhasho. La xiriirida hore waxaa aad uga dhex muuqda baahida degdega ah ee ilmaha, cuntada, qanacsanaanta iyo jiiifka. Way sahlan tahay in la fahmo in ilma ooyayaa uu soo gudbiyo baahidaan asaasiga ah, xataa carruurta yaryari intaas ka badan ayey soo gudbiyaan. Waxaana hadda la aqoonsaday in carruurta bilaabi karto sheekaysi.

Marka carruuri 'hadasho' la xiriirkoodu wuxuu si muuqata ula mid noqon karaa astaamaha iyo fal-samaynta sheekaysiga dadka waaweyn.

In kasta oo la sheekaysigoodu aanu ku salaysanayn erayo, carruurta waxay isticmaalaan dhawaaqyo kala-duwan, fal-tusmeed, dhaqdhaqaaqyada afka/carabka iyo wajiga oo ay farriinta ku gudbiyaan. Iyadoo dadka waaweyni kaalmaynayaan, carruurta waxay si degdeg ah u bartaan door qaadashada sheekada: sida 'hadalida' u hakashada jawaabta, iyo jawaab celinta. La sheekaysigaasi ma abuurto farxada ilmaha keliya, wuxuu caawimaa koritaanka luqada ee mustaqbilka. Sidoo kale, waxaa jira koritaan kale oo ilmuhu gaaro. Isku xirnaan ka dhexaysa waalidka (daryeellaha) iyo ilmaha ayaa xooga badan marka wada-xiriir macna samaynayaa dhaco, sida la sheekaysiga.

Sheekaysigu ma dhaco iyadoo ilmaha iyo qofka weyni aanay qayb ka qaadan (ama ilma weyn). Carruurta waxay u baahan yihiin in laga kaalmeeyo isku daygooda la hadlida, sheekadana waa inay xudun u tahay ilmaha baahidiisa iyo karaankiisa. Bilawga waxay u muuqan kartaa wax la yaab leh in lala sheekaysto ilmo, laakiin waxaa caawimi kara tusaalayaashaan:

- Marka sheekadu socoto waxaa loo baahan yahay in labada indhood is qabanayaan oo labada qof, ilmaha iyo qofka weyni, isu jeedaan
- Door qaadashada 'hadalka' in loo ogolaado in ilmuhu 'jawaabo'
- In lala socdo mawduca sheekada ee ilmuhu ka hadlayo. Masalan haddii ilmuhu xiisaynayo inuu ka hadlo jabaq, kala hadal jabaqda.
- Haddii aad soo xiranto oo aqoon weydo waxaad ka hadasho, weydii ilmaha tooyiska ay jecel yihiin, ama muuji tooyga kalana hadal
- Ku celi oo buunbuuni dhawaaqa ilmuhu sameeyey, iyo weliba hadalka 'saxda' ah
- Dhamaan hawlaha caadiga ah (sida qubayska, bedelida naabiga, quudinta iwm) sii fursadaha sheekaysi
- Carruurta waxay jecel yihiin hawlaha joogtada loo sameeyo iyo cayaarida gaymamka, waxayna si degdeg ah ugu maleeyaan waqti sheekaysi oo joogto ah iyo xarakaad
- Sheekadu waa inay socotaa keliya ilaa inta ilmuhu ka xiisaynayo
- Sheekadu waxay ilmaha siisaa koritaan maskaxeed, laakiin u wajihida si fan ah ayaa waxtar yeelanaysa halkii ay ka ahaan lahayd dersin siin oo kale.

Marka wax kasta oo kale laga yimaado, la sheekaysiga carruurta waa inay ahaataa fan – kuwa ka qaybgelaya oo dhan!

Hooyada ilma jira 4 bilood ayaa si faraxsanaan ah u tiri la sheekaysiga ilmahacada: *“ma xaqiiqsan inaad la sheekaysan’ karto ilma sidaas u yar. Hadda waqtigii bedelida waa ‘tookaysanaa sheekada’ - la sheekaysiga – way la cayaartay. Markay tabay ‘tookadayda’, si buuxda ayey u dbeegaysatay – waa wax la yaab leh.”*

*Xaashidaan xaqiiqada ee waalidka waxaa la hellaa iyadoo ku qoran luqada kala duwan waxaana lagala soo bixi karaa websaytka Early Childhood Connections oo ah [www.ecconnections.com.au](http://www.ecconnections.com.au)*

Dadaalka

Waxaa taageeray

